Washington State Department of Social & Health Services
Transforming lives

Oggaysiiska U waareejinta Kalkaalinta Guriga ama Ka saarida

Nursing Home Transfer or Discharge Notice

Foomkan waxaa loo isticmaali karaa si looga soo baxo shuruudaha loogu talogalay oggaysiiska wareejinta ama ka saarida midaas oo laga bilaabay dhinaca xarunta guriga kalkaalinta, oo aanan ahayn mid ka timid dhinaca qofka deganaha ah, dhakhtarka qofka deganaha ah, mas'uulka loogu talogalay wakiilnimada. Shuruudo gaar ah waxaa laga heli karaa 42 CFR §483.15(c), RCW 74.42.450, WAC 388-97-0120, iyo WAC 388-97-0140. **42 CFR §483.15(c)(3) oo kasta nuqul oo ah xarunta biloowday wareejinta ama oggaysiiska ka saarida waxaa KHASAB ah in loo diro dhinaca Xafiiska Shaqaalaha Cabashooyinka Daryeelka Muddada dheer ee Gobolka.**

Macluumaadka Qofka Deganaha ah	
MAGACA QOFKA DEGANAHA AH	LAMBARKA TELEEFOONKA (KU DAR FURAHA DEEGAANKA)
CINWAANKA	
Macluumaadka Kalkaalinta Guriga	
MAGACA GURIGA KALKAALINTA	LAMBARKA TELEEFOONKA (KU DAR FURAHA DEEGAANKA)
CINWAANKA	
MAGACA QOFKA XIRIIRKA	LAMBARKA TELEEFOONKA XIRIIRKA (KU DAR FURAHA DEEGAANKA)
Taariikhda Oggaysiiska La bixiyay / Taariikhda Dhaqan galayso	
XUSUUSNOOW: Taariikhda dhaqan galka waa in ay noqotaa ugu yaraan 30 maalmood oo laga bilaabo taariikhda oggaysiiska la bixiyo aan ka ahayn haddii uu jiro ka reebitaan sida waafaqsan WAC 388-97-0120 Qofka deganaha ahi wuxuu dooran karaa in uu guuro kahor taariikhda uu guuritaanku dhaqan galayo.	
TAARIIKHDA OGGAYSIISKA LA BIXIYAY	TAARIIKHDA DHAQAN GALAYSO (TAARIIKHDA KA SAARIDA)
Goobta loo Wareejinayo ama Loo saarayo Qofka deganaha ah (loo baahanyahay)	
MAGACA	LAMBARKA TELEEFOONKA (KU DAR FURAHA DEEGAANKA)
CINWAANKA	

SABABTA KEENTAY WAREEJINTA AMA KA SAARIDA

- ☐ Wareejinta ama ka saarida waxay lagama maarmaan u tahay adiga nolol wanaagaaga baahooyinkaagana looguma soo bixi karo xaruntan.
- ☐ Caafimaadkaaga wuxuu u ficnaaday si buuxda umana baahnid adeegaha laga bixiyo dhinaca xaruntan.
- ☐ Ammaanka dadka kale ee jooga xaruntan ayaa khatar ku jira midaas oo ay sabab u tahay xaalada qofka degaha ah.
- ☐ Caafimaadka dadka kale ee jooga xaruntan ayaa haddii kale khatar geli kara.
- ☐ Waxaad ku guuldaraysatay, kadib markii lagu siiyay oggaysiis suurtogal iyo munaasab ah, in aad bixisid (ama in lagaaga bixiyo hoosta Medicaire ama Medicaid) in aad joogtid xaruntan.
- ☐ Xarunta waa la xirayaa.

Fadlan bixo sharaxaad kooban si aad ugu taageerto tallaabadan. Soo lifaaq dukumeenti dheeraad ah haddii ay lagama maarmaan noqoto.

Codsanaya caawimaad: Haddii laga codsado, xarunta waxaa khasab ku ah in ay ku bixiso caawimaada lagama maarmaanka ah si loola xiriiro ururada bogga xiga iyo/ama codso rafcaan ku saabsan go'aankan haddii aadan oggolayn wareejinta ama ka saarida. Fadlan fiiri magaca qofka lagala xiriirayo guriga kalkaalinta iyo lambarka teleefoonka.

Xuquuqaha Rafcaanka:

- Waxaad xaq u leedahay in aad rafcaan ku samaysid wareejintan ama ka saaridan adiga oo samaynaya codsasho loogu talogalay dhagaysi maxkamad oo loo diro dhinaca Xafiiska Gobolka Washington ee maamulka Dhagaysiyada. Codsigaaga loogu talogalay dhagaysiga waxaa la samayn karaa wakhti kasta illaa 90 maalmood oo laga joogo taariikhda aad heshid oggaysiiskan.
- Haddii aad go'aansatid rafcaan, waxaad ugu codsan kartaa dhagaysiga si shakhsi ah, qaab teleefoon / boostada ama qoraal. Waxaad isticmaali kartaa foomka lasoo lifaaqay (DSHS 10-238, Codsiga loogu talogalay Maamulka Dhagaysiga maxkamada) si aad u codsatid rafcaan, laakiin ma ahan wax khasab ah.
- **Waxaad xaq u leedahay in aad sii joogtid xarunta illaa rafcaanka laga go'aansado, haddii codsiga dhagaysiga la helo marka ay tahay ama kahor taariikhda la filanayo wareejinta / ka saarida, ama maalinta adiga sida dhabta ah laguu wareejiyo / laguu saaro**. Kareebid: Haddii aanan wareejintaada ama ka saaridaada u keenaynin wax khatar ah caafimaadkaaga ama ammaankaaga, ama caafimaadka iyo ammaanka dadka kale ee xarunta jooga, waxaa dhici karta in lagu wareejiyo ama lagu saaro. Ka saarida lasoo jeediyay / taariikhda wareejinta waa mid ay ku qorantahay bogga hore ee oggaysiiskan.
- Haddii aadan samaynin wax rafcaan ah, xarunta kalkaalinta waxaa dhici karta in ay sii wado wareejintaada ama ka saaridaada.
- Haddii go'aanka dhagaysiga uu taageerayo go'aanka xarunta kalkaalinta (macnaheedu tahay in aad ku guuldaraysatid rafcaanka), xarunta kalkaalinta waxay sii wadi kartaa wareejintaada ama ka saaridaada 30 maamood kadib marka la geliyo amarka u dambeeya midkaas oo celinaya go'aanka.
- Haddii ka saarida / wareejinta aanan la celinin (macnaheedu tahay in aad ku guulaysatid rafcaanka), oona aadan ku jirin xarunta, waxaad xaq u leedahay in aad dib ugu noqotid xarunta sida ugu dhakhsiyaha baddan oona ku laabatid isla sariirta ugu horaysa ee laga helo qol u dhigma-mid khaas ah, oo adiga lagu siiyo waxaadna u qalantaa adeegaha laga bixiyo dhinaca xarunta.

U dir codsashooyinka dhagaysiga dhinaca: OFFICE OF ADMINISTRATIVE HEARINGS
PO BOX 42489
OLYMPIA WA 98504-2489
Lambarka teleefoonka: 1-800-583-8271
FAAKIS: (360) 586-6563

Shaqaalaha Cabashooyinka Gobolka Washington:

Barnaamijka Shaqaalaha Cabashooyinka Muddada-Dheer ee Gobolka Washington wuxuu diyaar u yahay in uu ka jawaabo su'aalaha oona bixiyo caawimaad khusaysa oggaysiiskan iyo arimo kale. Tooska shaqada qofka "Shaqaalaha Cabashooyinka ee LTC," Barnaamijka Shaqaalaha Cabashooyinka wuxuu ilaalinayaa oona dhiiragelinayaa xuquuqaha sharciga ah ee dadka deegaanka kuwaas oo ku nool xarumaha LTC. Barnaamijka Shaqaalaha Cabashooyinka ma ahan qayb ka mid ah dowlada gobolka lamana lahan wax xiriir ah xarumaha daryeelka muddada-dheer. Haddii aad jeceshahay in aad ka codsatid caawimaad dhinaca Shaqaalaha Cabashooyinka ee LTC, soo wac lambarkan teleefoonka lacag la'aanta ah 1-800-562-6028. Sidoo kale waxaad ka dhigi kartaa codsigaaga qaab qoraal ah adiga oo faakis ahaan ugu soo dira lambarkan (253) 815-8173, iimayl ugu soo dir halkan ltcop@mschelps.org ama boosto ahaan kusoo dir cinwaankan PO Box 23699, Federal Way, WA 98093-0699.

Xuquuqaha Naafada ee Washington:

Haddii aad qabtid naafo la oggaaday oo ku saabsan garaadka ama xanuun maskaxda ah, waxaad la xiriiri kartaa Xuquuqaha Naafada ee Washington si aad u heshid caawimaad laguugu caawiyo rafcaan ku samaynta go'aankan, teleefoonka-lacag la'aanta ah waa kan 1-800-562-2702, ama (206) 324-1521. Sidoo kale waxaad u samayn kartaa codsigaaga qaab qoraal ah adiga oo faakis ugu dira dhinaca (206) 957-0729, iimaylkan info@dr-wa.org ama boosto ugu dirtid halkan Disability Rights Washington, 315 5th Avenue S, Suite 850, Seattle, WA, 98104.

Oggaysiiska waxaa bixiyay:

SIXIIXA MAAMULAHA GURIGA KALKAALINTA / WAKIILKA	TAARIIKHDA	MAGACA QORAN

Oggaysiiska waxaa la siiyay:

MAGACA QORAN EE QOFKA DEGAHANA AH AMA WAKIILKA QOFKA DEGANAHA AH	TAARIIKHDA